

Akhbaaraha Ku Saabsan Cudurka Qoor-gooye “Meningococcal”
Fasaladda 6-12

Waalidiinta/Wakiilada Qaaliga ah:

Waxaa warqadaan lagu siinayaa in aad leedahay arday fasalkiisa yahay 6th – 12th ee Dugsiyada Degmada Seattle, iyadoo la raacaayo qodobka sharciga RCW 28A.210.080, sharciga waxaa loogu baahan yahay in la baxiyo akhbaaraha ku saabsan cudurka, waxa keeno cudurka, calaamadaha cudurka lagu garto, iyo habka loogu hor-tago. Cudurku waa mid dilaay ah, saas darted, waxaa muhiim ah in la ogaado akhbaarahaan.

Cudurka Qoor-gooye “Meningococcal” waxaa keeno koox baktiiriyo ah oo ku nool sanko iyo dhuunta; cudurka waxaa keeno waxaa loo yaqaan cudurka baktiiriye qoor-gooye. Dhalinyarada iyo dhalinyarada qaangaarayso waxay leeyihiin heer sare ku daarasada cudurka marka la barbardhigo guud ahaan dadka kale. Calaamadaha lagu garto cudurka waxaa ka mid ah qandho, jareeys, cun-cun, madax-xanuun, wareer, qoor-qalooc. Cudurku wuxuu ku faafaa wada xariirka toos ah shaqsiyada cudurka sahmeeyo kana mid ah dunkashada /shumiska, qufaca, hindisyada, ama la qaybisga alaabta cuntada iyo cabitaanka.

Hay’ada Caafimaadka Gobolka Washington wuxuu rabaa in aad ka digtoonaatid cudurkaan iyo talaal kuu diyaar ah oo kaa difaacaayo ka hor-taga Qoor-gooye. Talaalka wuxuu kaa cawinayaa difaaca ka hor-taga cudurka Qoor-gooye boqolkiiba ilaa 83% kuna dhacaayo dhalinyarada iyo dhalinyarada qaangaarayso. Talaalka waxaa lagula talinayaa ardayda galayso dugsiga dhexe (da’dooda 11-12) iyo dugsiga sare (da’da 15), talaalka waxaa ka faa’iidaysanaayo dhalinyarada iyo dhalinyarada qaangaarayso. **Talaalka ma looga baahano ka qaybgalka dugsiga.**

Hay’adda Caafimaadka waxay kugu dhiiragalinaysaa in aad barato cudurka qoor-gooye, kana la hadasho bixiyaha daryeelka caafimaadka ubadkaada oo ku saabsan talaalka. Waxaa kaloo akhbaaraha aad ka helayaa goobta shabakadahaan (websites):

- **Caafimaadka Dadweynaha Seattle/King County** -- (206) 296-4600
www.metrokc.gov/health/immunization/clinics.htm
- **Barnamijka Hay’adda Caafimaadka Talaalka ee Gobolka Washington**
www.doh.wa.gov/cfh/Immunize/meningococcal.htm
- **Xarumaha Cudurka Lagu Maamula iyo Looguna Hor-tago**
Akhbaaraha Talaalka: www.cdc.gov/nip/publications/vis/vis-mening.pdf
Akhbaaraha Cudurka: www.cdc.gov/ncidod/dbmd/diseaseinfo/meningococcal_g.htm
Waraaqadaha Xaqiiqda: www.cdc.gov/nip/vaccine/meninig/mening_fs.pdf

Maamulaha Barnaamijka
Howlaha Caafimaadka Ardayga
Dugsiyada Dadweynaha Seattle